Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay https://go.usa.gov/xtBQC.

Juun 10, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka
Ujeedada: Caymiska Qorshaha Caafimaadka Oregon iyo adeegyada I/DD ee loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn, iyada oo aan la eegayn xaalada muhaajirnimo

Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) iyo Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) waxay aaminsan yihiin in qof kasta oo ku nool Oregon ay tahay in uu helo daryeel caafimaad oo tayo leh. Tani waxaa ka mid ah adeegyada guriga iyo bulshada ku saleysan ee taageera faqo-qabka dadka reer Oregon **iyada oo aan la eegayn xaaladooda muhaajirnimo**.

Sanadkii la soo dhaafay, Sharci dejinta Oregon ayaa ansixisay xeer si loo abuuro barnaamijka Oregon Caafimaad Badan. Barnaamijkani wuxuu xaqiijin doonaa in dad badan oo ku nool Oregon ay heli karaan faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon iyo adeegyada iyo taageerada muddada fog ee ODDS.

Barnaamijka Oregon Caafimaad Badan wuxuu bilaabmi doonaa isaga oo laba weji ah. ODDS ayaa ka mas'uul ah ka caawinta in dadku helaan adeegyada iyo taageerada I/DD ee barnaamijku bixiyo.

Wejiga koowaad: Luulyo 1, 2022

Iyada oo aan la eegayn xaalada muhaajirnimo ama dakhliga, dhammaan dadka buuxiya u qalmida I/DD waxay awoodi doonaan in ay helaan adeegyada maamulka kiiska.

Dadka **da'doodu tahay 19–25 ama 55 iyo ka weyn ee buuxiya shuruudaha maaliyadeed iyo u qalmida I/DD** waxay heli doonaan:

- Faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon oo buuxa oo ay ku jiraan daryeelka caafimaadka, baaritaannada caafimaad, daryeelka ilkaha, daryeelka caafimaadka dhimirka, daawooyinka la isku qoro, gaadiid lagu aadayo balanta iyo waxyaabo badan. Iyada oo aan la eegayn xaalada muhaajirnimo, kuwa da'doodu tahay 18 jir iyo ka yar waxay isla hadaba haystaan faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon oo buuxa oo la sii marayo Cover All Kids.
- Adeegyada maamulka kiiska ee ODDS iyo adeegyada iyo taageerada I/DD oo buuxa oo ay ku jiraan adeegyada guriga iyo bulshada ku saleysan ee muddada fog sida adeeg bixiyaha, adeegyada shaqada, tiknoolajiga la adeegsado iyo caawimaada la xiriirta hawlaha caadiga ah ee nolol maalmeedka, sida qubeyska, lebisashada, socodka ama wax cunista.

Si aad u hesho adeegyada loogu talagalay dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka, fadlan la xiriir barnaamijka naafanimada korriinka ee degaankaaga wixii ka dambeeya Luulyo 1, 2022.

Wejiga labaad: Luulyo 1, 2023

Dhammaan dadka buuxiya shuruudaha u qalmida I/DD iyada oo aan la eegayn dakhliga ama xaalada muhaajirnimo waxay sii wadi doonaan in ay helaan adeegyada maamulka kiiska ee ODDS.

ODDS waxay ku rajo weyn tahay in faa'iidooyinka Qorshaha Caafimaadka Oregon iyo adeegyada iyo taageerada I/DD oo buuxa ay heli doonaan dhammaan da'aha kala duwan sanadka 2023. ODDS waxay bixin doontaa macluumaad cusub marka macluumaad dheeraad ah la heli karo.

Ilaha

Waxaa jira tiro ilo ah oo hadda la joogo la heli karo si looga jawaabo su'aalahaaga.

- Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee Barnaamijka Oregon Caafimaad Badan (Isbaanish)

- Waxyaabaha barnaamijka Oregon Caafimaad Badan uu boosta ku soo diro iyo warqado macluumaad wata (oo la heli karo iyaga oo ku qoran luqaddo badan).
- Faa'iidooyinka barnaamijka Oregon Caafimaad Badan saameyn kuma yeelano xukunka Gargaarada Dowladdeed 'Public Charge', laakiin waxaa jira waxyaabo la iska reebayo oo loogu talagalay adeegyada daryeelka muddada fog ee lagu bixiyo xarun dadka lagu xanaaneeyo ama isbitaalka gobolka. Wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri Ogow Xaqiiqooyinka ku saabsan Gargaarada Dowladdeed "Know the Facts about Public Charge."
- ODDS waxay toddobaadyada soo socda ilo dheeraad siin doontaa hay'adaha maamulka kiiska si ay gacan uga geysato isku diyaarinta hirgelinta.

Su'aalaha
Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan sida Oregon Caafimaad Badan u saameynayso adeegyadaada ODDS, email u dir ODDS.Questions@dhsoha.state.or.us.

Tani waa dhacdo muhiim ah oo loo qaaday gaarista sinnaan iyo helitaan ballaaran oo la xiriira adeegyada loogu talagalay dhammaan dadka qaba I/DD iyada oo aan la eegayn taariikhdooda. Way mahadsan yihiin shaqaalaheena iyo hawl-wadaagayaasheena ee shaqada aad haysaan si aad Oregon Caafimaad Badan uga dhigtaan mid dhab ah.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.